# Su'aalaha lagu weydiin doono marka aad buuxineyso foomka is-baaritaanka ardayga

## Markaad isticmaasho foomka galidda, waxaa lagu weydiin doonaa inaad:

- Muuji inaad soo galayso ama aad ka baxayso. Fadlan ka dooro "Checking in" labada ikhtiyaar.
- Magacaaga sheeg. Fadlan qor magacaaga hore iyo kan dambe labadaba.
- Bixi lambarka taleefankaaga. Fadlan ku dar lambar  si fudud lagaala soo xiriiri karo.
- Bixi cinwaanka emailkaaga. Waa inuu noqdaa cinwaan e-mayl ah oo aad inta badan eegto. Waa caadi hadduusan ahayn cinwaankaaga iimaylka ardayga.
- Aqoonso sababta aad u imaanayso xerada (campus). Fursadahaaga waxaa ka mid noqon doona Sheybaarka Fasalka, Baadhitaan, Jihaynta ESOL, ama Mid kale.
- Dib u eeg sideed su'aalood ee baadhitaanka caafimaadka oo xaqiiji inaad kaga jawaabi karto "maya" dhammaan su'aalaha.
- Muuji inaad dhammaysay aqoonta loo baahanyahay ee COVID-19.
- Xaqiiji markale inaad kaga jawaabtay "maya" su'aalaha baadhitaanka caafimaadka. Haddii aad kaga jawaabtay "haa" su'aalaha midkood, ama aadan wali qaadan tababarka COVID-19, waa inaad doorataa inaad fahamsan tahay inaad u baahan tahay inaad guriga joogto illaa intaad tababarka ka dhammaynayso waxaadna uga jawaabi kartaa "maya" dhammaan su'aalaha baadhitaanka.

## Markaad isticmaasho foomka ka bixidda, waxaa lagu weydiin doonaa inaad:

- Muuji inaad soo galayso ama aad ka baxayso. Fadlan ka dooro "Checking out" labada ikhtiyaar.
- Magacaaga sheeg. Fadlan qor magacaaga hore iyo kan dambe labadaba.
- Bixi lambarka taleefankaaga. Fadlan ku dar lambar  si fudud lagaala soo xiriiri karo.
- Bixi cinwaanka emailkaaga. Waa inuu noqdaa cinwaan e-mayl ah oo aad inta badan eegto. Waa caadi hadduusan ahayn cinwaankaaga iimaylka ardayga.
- Xulo dhammaan dhismayaasha ku yaal xerada aad booqatay.
- Geli qolalka aad ku jirtay dhisme kasta, haddii la yaqaan.
- Liistee qof kasta oo aad u dhawaatay intii aad ku jirtay xerada.

HIGHLINE COLLEGE